

# Waraaqda Xaqiiqooyinka Xeerka Cuntada #29

Waxa loo baahan yahay in aad ka ogaato Xeerka

WWW.HEALTHOREGON.ORG  
/FOODSAFETY

OAR 333-150-0000,  
CUTUBKA 2-401.11

## Waxyaabaha lagu darayo.

(1) "Waxyaabaha lagu darayo cuntada" waxay leeyihiin micnaha lagu xusay Xeerka Cuntada, Daawada, iyo Waxyaabaha la isku qurxiyo, ee Federaalka, § 201(s) iyo 21 CFR 170.3(e)(1).  
(2) "Waxyaabaha lagu darayo ee midabka leh" waxay leeyihiin micnaha lagu xusay Xeerka Cuntada, Daawada, iyo Waxyaabaha la isku qurxiyo, ee Federaalka, §70.3(f).

## 3-202.12 Waxyaabaha lagu darayo.

Lama rabo in cuntada ay kujiraan waxyaabaha cuntada lagu daro oo aan loo fasixin kuwaas oo ka badan caddadka lagu qeexay 21 CFR 170-180 kaasoo la xiriira waxyaabaha cuntada lagu daro, waxyaabaha guud ahaan loo aqoonsaday in ay ammaan yihiin ama horay loo mamnuucay kuwaas oo ka badan caddadka ku cad 21 CFR 181-186, walxaha ka badan caddadka lagu cadeeyay q CFR qaybta hoose ee C Qaybta 424.21(b) Waxyaabaha cuntada lagu daro iyo ilaha shooqaaca, ama waxyaabaha ka hara sunta cayayaanka kuwaas oo ka badanaya xukunada lagu cadeeyay 40 CFR 180 U dulqaadashada sunta cayayaanka ee cuntada kujirta, iyo waxyaabaha laga soo reebay. P

## SABABAH LA XIRIIRA CAAFIMAADKA BULSHADA:

Waxyaabaha cuntada lagu daro ee qaybta ka noqda cuntada, si toos ah iyo si aan toos ahayn. Waa in si adag loo maamulaa sababtoo ah caddadka xad-dhaafka ah wuxuu noqon karaa mid waxyeelaya isticmaalaha. Wasakhowga aan loola qasdin ama waxyaabaha haraadiga ah waxay soo galaan marinada cuntada. Dulqaadka ama heerka badqabka loogu tala galay kiimikooyinka waxaa go'aamiya qiimaynta khatarta ayada oo lagu salaynayo daraasadaha sun ahaanta iyo qiyaasaha isticmaalka.

Waxyaabaha lagu daro Cuntada iyo Midabka waa in loo isticmaalo si waafaqsan sharciiga maamulidda cuntada, ama midabka ee federaalka, ogaysiis taabashada cuntada ah oo muhiim ah, ama meesha ugu danbaysa ee sharciiga ka dhaafidda. Shuruudda noocyadaas ah, ogaysiisyada, iyo ka dhaaftaanada guud ahaan waxaa la iskugu geeyaa saddex qaybood: *aqoonsiga* maaddada, *sifooyinka* ay kujiraan nadiif ahaanta ama dabeecadaha muuqaal ahaan, iyo *xamibaadaha* ku saabsan shuruudaha isticmaalka. Si cuntada, ama midabka cuntada lagu darayo ay ugu hogaansamaan, isticmaalku waa in uu waafaqaa dhammaan saddexda habraacba.

## Waxyaabaha lagu darayo

Dhammaan cuntada imanaysa maqaaxida waa in ay ka timaaddaa ilo la meelmarayay. Inta badan cuntada iyo waxyaabaha cuntada lagu daro ee aad ka iibsato adeegbixiyahaaga ganacsiga waa kuwo Guud ahaan loo Aqoonsanyahay in ay Ammaan yihiin, ama GRAS. Tusaalayaashu waxay noqon karaan milix, basbaas iyo cinnamon. Waxaa jira liis kujira maadooyinka GRAS ee [21 CFR 170-186](#), kuwaas oo qoraya magacyada walxaha cuntada iyo sidoo kale caddadka laga isticmaali karo. Waxaa jira waxyaaba cuntada lagu daro oo layaab leh kuwaas oo la ogolyahay, sida monosodium glutamate (kuwaas oo ay dad badan u maleeyaan in aysan ammaan ahayn in la cuno). Waxyaabaha midabka ah ee lagu daro, sida midabaynta cuntada ee guuduudan, ayaa sidoo kale la ogolyahay ilaa inta tilmaamaha la raacayo.

In badan oo kamid ah wax soosaaradaan waxaa aqbalay Maamulka Cuntada iyo Daawada (FDA) mid walba gaarkiisa si gaarkiisa loogu isticmaalo. Tusaale ahaan, haddii spirulina loo isticmaalo midabaynta, waxaa la ogolyahay in laga isticmaalo caddad yar meesha lagu diyaarinayo. Laakiin budada spirulina laguma dari karo si ay u noqoto qayb kamid ah cabitaanada baarka kafeega. Tusaale kale waa dhuxusha qunbaha, taasoo la mamnuucay inkasta oo laga abuuray cunto la aqbalay (qunbe).

In badan oo kamid ah wax soosaaradaan waxaa aqbalay Maamulka Cuntada iyo Daawada (FDA) mid walba gaarkiisa si gaarkiisa loogu isticmaalo. Tusaale ahaan, haddii spirulina loo isticmaalo midabaynta, waxaa la ogolyahay in laga isticmaalo caddad yar meesha lagu diyaarinayo. Laakiin budada spirulina laguma dari karo si ay u noqoto qayb kamid ah cabitaanada baarka kafeega. Tusaale kale waa dhuxusha qunbaha, taasoo la mamnuucay inkasta oo laga abuuray cunto la aqbalay (qunbe).

Noocyadaan kala saarista ah waxay adkayn karaan go'aaminta waxsoosaarka la ogolaaday in ay noqdaan kuwo cuntada lagu darayo iyo kuwa aan la ogolayn. Ayada oo arintaani sabab u tahay, in soosaaruhu la imaan karo waraaq ka socota Xarunta Badqabka Cuntada iyo Nafaqada La isticmaalo (CFSAN) ama FDA maahane taasoo sheegaysa in waxsoosaarkooda loo ogolaaday in uu noqdo mid cuntada lagu dari karo, looma ogola in laga isticmaalo

goobta cuntada. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxyaabaha cuntada lagu daro, tag: <https://www.fda.gov/food/food-ingredients-packaging/determining-regulatory-status-food-ingredient>.

Qaar kamid ah waxyaabaha cuntada lagu daro ee FDA **aysan** ogolaan wakhti xaa-dirkaan waxaa kamid ah:

- Kaarboonka/dhuxusha la soo saaray
- Budada kava (laguma dari karo cuntada, laakiin xididka oo dhan waa la khamiirin karaa si shaah looga sameeyo)
- Maadooyinka nitrites/nitrates (ayada oo aan la kala saarayn si loo xaqiijiyo in laga isticmaalay caddadkii ku haboonaa)
- Maadooyinka sulfites-ka ee kujira qudaarta iyo miraha kuwaas oo loogu tala galay in cayriin lagu bixiyo



## Waxsoosaarada "dabiiciga ah" ama "asalka ah" si aan shardi lahayn looma fasaxo in loo isticmaalo waxyaabaha cuntada lagu daro

- Kratom, nooc kasta oo ay tahay
- Blue Lotus (blue water lily, sacred blue lily)
- Waxsoosaarada aan sida saxda ah loo calaamadayn/aan la calaamadayn

Waxsoosaarada qaar ee la aqbalay in si toos ah loogu daro cuntada waxaa kamid ah:

- Saliidda qunbaha MCT
- Saliidda CBD ee ka imaanaysa soosaareyaasha Oregon (waxsoosaarada ka imaanaya gobolada kale waa in ay muujiyaan in ay buuxinayaan shuruudaha Oregon)

Dadka ku shaqaynaya waa in aysan u samayn sheegashooyin caafimaadka khuseeya, sida "waxay yaraynaysaa welelka" ama "waxay yaraynaysaa cadaadiska dhiigga" waxsoosaar kasta oo ay cuntada ku darayaan.